



**Fariinta Guddoomiye-xigeenka Waxbarashada Dr. Yvonne Curtis  
Ee heerka shaqaaleynta Dugsiyada Dadweynaha Portland 2018-19  
Abriil 17, 2018**

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay ku gudo jiraan sidii loogu qoondeyn lahaa shaqaalaha macalimiinta ee ka dhigi lahaa dhammaan dugsiyada degmada. Waxaa xaqiiq ahayd sannado fara badan, inaan ku shaqeyneynay miisaaniyad aanu gobolku u maaligalin sidii la rabay, inaguna aan u isticmaali lahayn agabkaas aanu haysano sida ugu wanaagsan. Waxaan ognahay, waalidiinta, ardayda iyo shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay jecel yihiin in ogaadaan isbedelka ku dhici doono mid kasta iskuuladooda. Haddaba lama ogaan karo qoondeynta kooban ilaa tirada iskuulada iska diiwaangalisay ay noqotay mid cad marka laga gaaro xilliga dayrta, iyada oo aan idinla wadaagi doono xogta noo soo baxda waqtigaasi, sidoo kalena aan ka jawaabi doono su'aalo fara badan oo aan ilaa maanta maqleyno.

Marka iminka la eego hoggaaminta Guddoomiyaha Waxbarashada ee Guadalupe Guerrero iyo anigu, waxa aanu isla meel dhignay hab cusub oo aan ku qeexayno sida iskuulada loogu meeleeeyo macalimiinta wax ka dhigta. Waxa aan aaminsanahay in isbedel loo baahan yahay lagu sameeyo sababo dhowr ah awgeed, oo ay ka mid yihiin casharada fasalada la siiyo dugsiyada dhexe iyo kuwa sarre oo aan ahayn kuwa isku mid ah oo laga fiirsaday looguna qeybiyo macalimiinta iskuulada iyo iyada oo ayna caddeyn in si siman loo maalgaliyey marka laga eego dhinaca jinsiga- iyada oo lacag loo meeleeeyo sidii loo horumarin lahaa ardayda sida taariikhdu inoo sheegeyso aan helin addeegii ay u baahnaayeen. Habkani cusub ee shaqaalaha loo meeleyntayo wuxuu ka dareen-celinayaa dareenadaas oo wuxuu ku saleysan yahay himilooyin loo asteeyey sidii loo gaari lahaa:

- In la xaqiijiyo iskuuladu inay haystaan shaqaale ku filan tirada fasalada wax bari kara
- Taageerida himilooyinka sinaanta dugsiyada degmada.
- In iskuul kasta la siiyo barnaamij waxbarasho oo saldhigiisu yahay aasaasi ah.
- In si tartiib ah loo siiyo deganaansho weyn .

Isticmaalida himilooyinkani ayaa sumad u ah in dugsiyada degmadu ay tixgalin siinayaan dhinacooda maalgalinta shaqaale macalimiin dheeraad ah iyo sidii loogu qoondeyn lahaa boosas u dhigma waqti buuxa(FTE) taasi oo raad togan ku yeelan doona sanad-dugsiyeedka soo socda, gaar ahaan iskuulada taariikh ahaan diiwaangalintoodu ay hooseysay.

Sida uu yahay xaalku sanad kasta, iskuulada qaarkood waxa ay arki doonaan shaqaalihii macalimiinta ahaa oo hoos u dhacay, halka kuwa kalena ay arki doonaan tiradii shaqaalaha oo kordhay. Isbedeladanu waxa sababo arrimo door ah, oo ay ka mid yihiin diiwaangalinta la saadaaliyey, dib u eegista maalgalin loo siman yahay iyo isbedelada lagu sameeyey barnaamijyada casharada la dhigo. Sanadkani, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay furayaan labo dugsi dhexe oo cusub, waxa ay kale oo sideed iskuul oo K-8 loo bedelayaan in ay noqdaan dugsiyo dhexe K-5 oo leh waxbarashada labada luqadood lagu dhigo oo Isbaanish ah, isbedeladu waa kuwo aad loo dareemayo.

Haddaba si aanu kaaga caawino sidii aad u fahmi lahay isbedelada shaqaaleynta, halkani waxaan kuugu soo gudbineynaa su'aalaha caadiga ah ee la isweydiyo jawaabahoodii.

*S: Maxaa loogu talagalay inuu qabto noocan cusub ee shaqaaleyntu?*

J: Inuu u ballanqaado iskuul kasta – gaar ahaan iskuulada yar – inay helaan tiro macalimiin ah oo ku filan; inuu u ballanqaadayo barnaamijyo waxbarasho saldhiga u ah casharada loo baahan yahay iyo baahiyaha Waxbarashada Jidhka(PE) iyo Caafimaadka; in la xaqiijiyo sidii maalgintaasi si siman oo wanaagsan isticmaalkeeda ugu saldhigi lahayn.

*S: Sidee ayuu meeleynta shaqalaha ee cusubi u horumarinayaan natiijada ardayda?*

J: Iyada oo aynu tirada fasalka ku koobeyno tiro macquul ah, siineyna barnaamijyo waxbarasho oo aasaasi ah iskuulada K-12, iyo xaqiijinta sidii aan u higsan lahayn sida u haboon in dhaqaalaha loo qoondooyo si loo siman yahay, dugsiyada degmadu waxa ay ardaydu siin doonaa waxbarasho leh waayo aragnimo degan dhammaan iskuulkada iyo iyada oo kor loo qaadayo waayo-aragnimada waxbarashada ardayda taariikh ahaan helin addeegii waxbarasho ee ay u baahnaayeen.

*S: Sidee ayaa loogu qeybiyey maalgalinta si siman sanad-dugsiyeedka 2018-19?*

J: Si aad u hesho maalgalin loo siman yahay, waxaa looga baahan yahay maamulayaasha dugsiyadu in soo bandhigaan xog cadeyneysa oo sugan in maalgalinta ay ka faa'iidi doonaan ardayda taariikh ahaan helin addeegyadii ay u baahnaayeen ama ardayda laga tirada badan yahay . Waxaa la beegsan doonaan iskuulada boqolkiiba 15 ama ka badan ardayda wax ka barataa dhaqaale ahaan hooseeyaan ama boqolkiiba 40 ama taariikh ahaan helin addeegyadii waxbarasho ee ay u baahnaayeen.. Markii hore, sida loo isticmaalo maalgalinta loo siman yahay waxa ay ahayd mid aan sugneyn sidii loo taageeri lahaa ardayda aan helin addeegyadii ay u baahnaayeen.

*S: Waa maxay isbedelada la taaban karo ee lagu sameeyey sida loo meeleynto boosaska waqtiga buuxa(FTE)?*

J: Dugsiyada hoose, dugsiyada dhexe iyo dugsiyada K-8, shaqaalaha waxaa loo qoondeyn iyada oo la eegayo tirada fasalada loo baahan yahay oo la fiirinayo heerka fasalka ama lagu saleynayo maadada la saadaalinayo diiwaangalinta heerka fasalada. Waqtiyadii hore, sida loo qoondeeyo shaqaalaha waqtiga buuxa(FTE) waxaa loo qoondeyn jiray saami ahaan ku salaysan diiwaangalinta la saadaalinayo iskuulka oo dhan. Isebdelkani wuxuu ballan qaadayaa in fasal kasta in ay lagama maarmaan tahay inay yeeshaan tiro macalimiin ah. Dugsiyada Sarre sida loo qoondooyo shaqaalaha waqtiga buuxa(FTE) waxa ay ahaan doontaan mid ku salayn saami sidii ay markii hore ay ahaan jirtay, laakiin dhammaan iskuulada sare waxay ay ku bilaabi doonaan tiro yar oo macalimiin ah oo leh waqtiga buuxa(FTE), si loo xaqiijiyo in ay helaan shaqaaleyn ku filan iskuulada yar yar iyo iskuulada isdiwaangalintoodu hoos u dhacday si ay ardaydu u helaan casharadii waxbarasho ee rasmiga ahaa ay u baahnaayeen iyo casharada waxbarasho ee gobolku waajibiyey in loo dhigo ardayda.

*S: Tirada macalimiinta ee degmada miyaa la kordhinayaa mise waa la jarayaa?*

J: Degmadu waxa ay tirada fasalada macalimiinta ka dhigta waqtiga buuxa(FTE) ku kordhisay 22 macalin oo fasalada wax ka dhigi doono marka la garab dhigo sanad-dugsiyeedkani. Degmadu waxa ay miisaaniyad u qoondeysay shaqaale dheeraad ah, kuwaasi oo lagu meeleyn doono xilliga dayrta meeshii ay baahiyo ka soo baxdo marka la soo gabogabeeyo isdiwaangalinta ardayda ee la ogaado iskuul kasta tirada iska diiwaangalisay. Intaas waxaa dheer, bulshadu iskuuladu sidoo kale waxa ay maalgalinayaan sanduuqa Maalgalinta Loo Siman Yahay(Equity Funda),Foundation funds, iyo ilaha dhaqaale ee kale kuwaasi oo taageera meelaha mudnaanta la siiyo ee ay ka mid yihiin shaqaale dheeraad ah. Kabkani maalgalined ee dheeraad ah wuxuu soo kordhiyaa inuu caawiyo iskuulo gaar ahi inay helaan shaqaale dheeraad ah oo loo qoro iskuuladaasi.

*S: Sidee looga go'aan gaarayaa qoondoyntaa dheeraadka ah?*

J: Dugsiyada degmadu waxa ay isticmalai doonaa imtixaan leh labo qeybood. Macalimiintu waxa ay tegi doonaan iskuulada qabo baahi aad u weyn oo ah sidii tirada ardayda fasalada ku jirtaa u noqon lahayd kuwa maangal ah IYO iskuulada leh baahiyaha dhabta ah ee dhinaca sinaanta. Dugsiyada degmadu sidoo kale waxa ay kala siin doonaan mudnaantooda sidii loogu qoondeyn lahaa macalimiin dheeraad ah fasalada oo leh waqti buuxa si loo hubiyo in si wanaagsan oo siman loo siiyo barnaamijyo waxbarasho darisyada diiwaangalinta ardaydu ay hooseeyso.

*S: Haddii dugsiyada degmadu ay ku darayaan macaliniin leh waqti buuxa(FTE) oo dheeraad ah, waa maxay sababta macalimiinta qaar ayna u meeleysneyn?*

A: Sanad kasta, tiro boqolkiiba yar oo macalimiin ah ayaa ku meeleysneyn goobihii hore ee ay markii hore ka shaqeynayeen. Tani waxa ay ku salaysan tahay sida shaqada loogu soo kala horeeyey iyo taageerada qof ahaan ee macalinka. Macalimiinta aan la meeleyn waxa ay fursad u leeyihiin in ay soo codsadaan shaqooyinka kale ee degmada dhexdeeda iyada oo inta badan lagu meeleeyo. U diyaar garowga dib u meeleynta sanad-dugsiyeedkani 2018-19 , waxa aan la meeleyn ku dhawaad 150 macalin- celcellis ahaan degmada. Sidaas awgeed, dugsiyada degmadu waxa ay soo bandhigayaan 300 shaqo kuwaasi oo macalimiintaasi aan la meeleyn ay soo codsan karaan.

*S: Haddii ay degmadu macalimiin dheeraad ah ku daraysa, maxay tahay sababta ay iskuulada ay noo soo wargalinayaan in nus macalimiinta leh waqtiga buuxa(FT) ay waayayaan boosaskoodii?*

J: Sanad kasta, iskuulada qaarkood waxa ay la kulmaan hoos dhac ku yimaada macalimiinta waqtiga buuxa leh(FTE) iyada oo kuwa kale ay helaan kuwo dheeraad ah. Arrimaha sababao waxaa ka mid ah isbedelada ku dhaca diiwaangalinta, isbedelada barnaamijyada waxbarashada iyo sida loo meeleeyo maalgalinta loo siman yahay, iyo kuwa kale. Sanadkani, todobo iskuul oo K-8 ayaa waxaa loo bedelay inay noqdaan K-5, taasi oo macnaheedu noqon doono in tiro shaqaale ah ay waayi doonaan, kuwaasi oo loo bedeli doono dugsiyo dhexe. Intaasi waxaa dheer, agabyada qaarkood waxaa laga soo qaadi doonaan iskuulada waaweyn iyada oo la geyn doono iskuulad yar yar si loo hubiyo inay helaan shaqaale ku filan

[Halkan ka fiiri lifaaqa shaxda sida iskuul kasta loogu qoondeeyey.](#)